



(Qofka akhriya labada aayadood ee suuradda Al-baqara u dambeeya habeenka way ku filan yihiin)

Abii Maseud-Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Nabigu scw wuxuu yiri: (Qofka akhriya labada aayadood ee suuradda Al-baqara u dambeeya habeenka way ku filan yihiin).

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu sheegay in qofka akhriya labada aayadood ee u dambeeya suuradda Al-baqara habeenkii Ilaahay uu kaafiyaa sharka iyo dhibaataada, waxaa kaloo la yiri: way ka kaafidaa salaatul-laylka, waxaa kaloo la yiri: waxay ka kaafidaa adkaarta kale, waxaa kaloo la yiri: waa waxa ugu yar ee ay kaga gudmayso akhrinta Qur'aanka ee salaatul-laylka, siyaabo kalana waa lagu fasiray, waxaa dhici kara inuu sax yahay dhamaan waxaa lagu fasiray oo dhan oo ay erayga soo wada galaan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/6274>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

